

Warbixin ku saabsan fasalka barbaarinta ee sanad- dugsiyeedka 2020/2021

Degmada Karlskoga, waxaa dhamaan ardayda buuxisay lix sano, inta lagu dhexjiro sanadka 2019-ka boos laga siiyaa fasalka barbaarinta (förskoleklass). Fasalka barbaarintu waxaa kolka laga bilaabo xili-dugsiyeedka dayrta 2018 uu noqon doonaa mid waajib ah. Sanadkan waxaa uu noqon doonaa qaab isku xire ah oo u dhexeeya fasalka barbaarinta iyo dugsiya hoose/dhexe. Fasalka barbaarintu ma aha mid aad wax kharash ah bixineysid. Fasalka barbaarintu waxaa uu raaca wakhtiga sanad dugsiyeedka waxaana uu bilaamaa maalinta uu dugsiya hoose/dhexe bilaabanaayo. Howshu waxaa ay socotaa inta u dhexaysa isniinta iyo jimcaha, waxaana sanad dugsiyeedka ku jira afar maalmood oo shaqaaluhu wax baranayaan, kuwaasoo ku soo aada wakhtiga fasalka barbaarinta ama iskuulka si guud.

Muxuu yahay fasalka barbaarinta (förskoleklass)?

Fasalka barbaarinta ama fasalka ka horeeya fasalka kowaad ee dugsiya hoose waxaa loo diyaariyey caruurta lix jirka ah, waxaana uu ka mid yahay iskuulada degmada. Fasalka barbaarintu waxaa uu ka jiraa dhamaan iskuulada leh fasallada hoose. Ka dibna ardaygu waxaa uu sii gudbaa fasalka kowaad ee isla dugsigii uu ka dhiganaayey fasalka barbaarinta. Kolka laga reebo ardayda dhiganeysay dugsiya (Häsängsskolan) ee u bedeshey dugsiya (Stråningstorpsskolan) inta ka horeysa fasalka labaad iyo ardayda iskuulka (Rävåsskolan) ee u bedelata iskuulka (Bregårdsskolan) kolka la gaaro fasalka 4`aad.

Howsha laga qabto fasalka barbaarintu waxaa ay ku dhisan tahay aqoon laga keenay dhinaca barbaarinta iyo aqoon iskuulba. Noocyada kala duwan ee tacliinta barbaarinta ayaa qayb weyn ka ah howlaha fasalkan barbaarinta. Ciyaar, dhaqdhaqaaq, heeso, muusiko, jilitaan ayaa ka mid ah waxyaalaha ay ardaydu ku tababartaan. Waxaa kaloo ka mid ah barashada xisaabaadka, luqada, akhriska iyo qoritaanka.

Kulan waalid bisha maajo (maj)

Dhamaan waaalidiinta waxaa lagu casumayaa iney kasoo qaybgalaan kulan waalid oo ka dhici doona iskuulada kala duwan kolka la gaaro bisha maajo (maj). Kolkaad timaado kulanka waalidka waxaa lagu siin doonaa warbixin ku saabsan fasalka barbaarinta iyo sida uu u shaqeeyo. Waxaa kaloo jiri doonta fursad aad su`aalo ku weydiiso maamulka iyo macalimiinta.

Ilmahaagu ma u baahan yahay in la hayo iskuulka ka dib?

Haddii uu ilmahaagu u baahan yahay in lagu hayo ka dib kolka casharada iskuulku dhamaadaan. Kolkaas waxaa ilmahaaga lagu casumayaa goobta ilmaha lagu hayo iskuulka ka dib (fritidshem). Meesha lagu haynayaa waa isla barta ay ku yaalaan fasalada barbaarinta, maalmaha caadiga ah wakhtigu waa 06.00 ilaa 18.00. Haddii baahidaasi jirto ku qor isku-tallaab foomka jawaabta. Haynta ilmaha ee iskuulka dhexdiisa (fritids) waxaa ay bilaabataa laga bilaabo isniinta 3-da bisha agoosto. Taas waxaa xitaa ku jira caruurta horay u haysay booska lagu hayo iskuulka ka dib.

Qaybta caruurta lagu hayo ee iskuulka ee ku xiran fasalka barbaarintu waa lacag. Waxaana ardayga laga qaadaa lacag horay loo qorsheeyey. Warbixin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa hoyga degamda www.karlskoga.se

Gal qaybta waxbarashada & xanaanada –dugsiya hoose/dhexe- qaybta ilmaha lagu hayo iskuulka ka dib (Utbildning & barnomsorg - Grundskola – Fritidshem)

Waxaad kaloo la xiriiri kartaa qofka caawinaha ah ee dhinaca meeleynta, adigoo maraaya xafiiska adeega bulshada oo leh taleefoonkaan: 0586-610 00 ama sanduuqaan boostada dhinaca internetka: barnomsorg@karlskoga.se.

Haddii ilmuhu uu tegaayo guriga lagu hayo iskuulak ka dib(fritidshem) ama uu usii gudbaayo qaybta habeenkii lagu hayo ilmaha, kolkaas waxaa waalidku xaq u leeyahay safarka u dhexeeya labadaas meelood, kaasoo loogu yeero safarka xanaanaynta. Warbixin dheeraad ah ka akhri hoyga: www.karlskoga.se/skolskjuts.

Baabuurka ardayda geeya fasalka barbaarinta?

Haddii ilmahaagu uu keliya ka qayb qaato fasalka barbaarinta, balse aanu tegin meesha ilmaha lagu hayo. Kolkaas waxaa uu xaq u leeyahay baabuur guriga geeya. Warbixin dheeraad ah iyo codsiga waxaad ka heli kartaa: www.karlskoga.se/skolskjuts.